In shirkad laga furto Iswiidhen

tillväxt verket

Qoraallada wakaaladda kobcinta dhaqaalaha oo pdf ah laga dalban karaa ama laga soo degsan karaa barta tillväxtverket.se/publikationer.
Waxaa jira qoraallo ay soo saarto wakaaladda Nutek.

© **Wakaaladda kobcinta dhaqaalaha iyo horumarinta**
Stockholm, oktoober 2017
Waxsoosaar: Ruth
Daabacaadda: ISBN 978-91-88601-34-6
Qoraal internet: ISBN 978-91-88601-33-9
Warbixin 0690

Wixii su'aalo ku saabsan daabacidda, kala xiriir:
Sara Strandqvist
Telefoonka dhexe 08-681 91 00

Loogu talagalay qofka magangelyadoonka ah



Waxaad ganacsiga bilaabi kartaa iyadoo weli lagu gudajiro arrintaada magangelyada. Marka hore ka codso Hay'adda canshuuraha inay kuu oggolaado caddaynta canshuurbixinta F. Adiga leh shirkadda ganacsiga ayaa bixinaya canshuurta F. Marka ay Hay'adda canshuuruhu kuu oggolaado caddaynta canshuurbixinta F, waxay ku siineysaa lambar xiriir. Lambarka xiriirka waxaa loogu talagalay qofka aan haysan lambar aqoonsi. Lambarka xiriirka waxaa loogu baahan yahay inay qofka magangelyadoonka ah u suurtagasho in uu ganacsi ka bilaabo Iswiidhen.

XASUUSNOW

Inta aadan go'aansan inaad ganacsi bilowdo, xasuusnow ganacsiga qofka magangelyadoonka ahi uusan isbeddeli karin haddii codsigiisa magangelyada la diido. Qofka magangelyadoonka ah oo muddo afar bilood ah shaqaynayey loona ballanqaaday in uu ugu yaraan 12 bilood sii wado shaqadaas, wuxuu codsigiisa u beddeli karaa sharciga shaqada.

Khuseysa qofka la siiyey sharci degganaansho

Qofka la siiyey sharciga degganaanshaha joogtada ah ama kan kumeelgaarka ah waa in uu sida dhaqsaha badan isaga diiwaangeliyaa Hay'adda canshuuraha. Haddaba si aad u bilowdo barashada af-iswiidhishka oo aad uga faa'iiddo caymiska dadweynaha waxaa loo baahan yahay inaad diiwaansan tahay. Marka lagu diiwaangeliyo ayaad samaysan kartaa warqadaha ama kaararka aqoonsiga oo aad u baahan tahay si aad bangiga koonto uga furato.

XASUUSNOW - KU SOCO ADIGA LA SIIYEY SHARCIGA DEGGANAANSHAHA KUMEELGAARKA AH

Haddii qaxooti laguu aqoonsaday waxaa lagu siinayaa sharci degganaansho oo saddex sano ah. Haddii laguu aqoonsado inaad u baahan tahay magangelin waxaa lagu siinayaa sharciga degganaanshaha oo 13 bilood ah.

Haddii aad weli isku masruufto ganacsigaaga marka sharciga kumeelgaarka ahi kaa dhammaado, waxaa fursad laguu siinayaa inaad codsato sharci degganaansho joogto ah. Ka feker inay hay'adaha ku adkaan karto inay qiimeeyaan inaad masruufkaaga ka soo saari karto ganacsigaas mar haddii aadan ahayn mushaharle.

Qofka magangelyadoonka ah oo la siiyey sharci degganaansho oo kumeelgaar ah isla markaasna ku hawllan ganacsi gaar ah.

Haddaad tahay qof magangelyo codsaday oo la siiyey sharci degganaansho oo kumeelgaar ah oo ganacsi ku shaqaysta, waxaa mararka qaarkood lagu siin karaa sharci degganaansho oo joogto ah.

SI AAD U HESHO SHARCI DEGGANAANSHO OO JOOGTO AH WAA INAAD

- la timaaddaa caddayn inaad waaya-aragnimo wanaagsan u leedahay qaybta ganacsiga iyo sida ganacsi loo meelmariyo
- muujisaa inaad aqoon wanaagsan u leedahay af-iswiidhishka iyo/ama af-ingiriiska
- caddeysaa inaad ku jirto ganacsi aad mas'uul ka tahay oo aad ugu yaraan ganacsigaas leedahay bar
- muujiso inaad masruufkaaga la soo bixi karto iyo inaad haysato hanti kuugu filan ganacsi aad bilowdo oo aad isku masruufto ugu yaraan laba sano. Waxaad isku xisaabineysaa dakhliga shaqaale badan iyo kan shirkaddaada.



SOO GUDBI CODSIGA KA HOR INTA UUSAN SHARCIGA DEGGANAANSHUHU DHICIN

Waxaa muhiim ah inaad codsato in laguu dheereeyo sharciga degganaanshaha ka hor inta uusan sharcigu dhicin, laakiin aysan muddo ka horreysa saddex bilood.

Hay'adda Socdaalku waxay sharciga degganaanshaha joogtada ah go'aan ka gaari kartaa kaddib marka waqtiga sharciga kumeelgaarka ahi dhaco.

Haddii ganacsigaagu uu buuxin waayo shuruudda sharciga degganaanshaha joogtada ah, waxaa kolkaas dhici karta in laguu dheereeyo sharciga degganaanshaha kumeelgaarka ah, waase haddii aad weli u baahan tahay magangelyo.

Barta migrationsverket.se waxaad ka sii akhrisan kartaa warbixin ku saabsan sidaad u codsaneyso iyo warqadaha lagaaga baahan yahay.

Caawimaad dheeraad ah

XAFIISKA SHAQADA

Marka aad ganacsi bilaabeyso waxaad mararka qaarkood caawimaad ka heli kartaa Xafiiska shaqada. Barnaamijka lagu magacaabo “Caawimaadda bilaabidda ganacsi”. Xafiiska shaqadu wuxuu marka hore eegayaa hindisaha iyo qorshaha ganacsiga si loo qiimeeyo in ganacsigaasi yahay mid aad guul ka gaareyso. Gacanhayaha xafiiska shaqada kala hadal inay taasi ku khuseyso.

Waxaa lagaa caawini karaa:

- Tababar shaqo oo aad ku sameyneyso qaybta ganacsiga aad dooneyso inaad bilowdo
- Waxaana ganacsatadaas la siiyaa waxbarasho turjubaan joogo oo ku saabsan canshuuraha, xisaabxir iyo ruqsadaha laamaha ganacsiga
- Waxaa taageero iyo talooyin lagugu siinayaa luuqaddaada hooyo
- Hab lagu la xiriiro oo xiriir joogto ah looga samaysto laamo ganacsi oo kala duwan
- Dabagal luuqaddaada ah oo lagu sameynayo halka ganacsigu kuu marayo.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka waxaad ka akhrisan kartaa barta Xafiiska shaqada:
arbetsformedlingen.se/startaeget

QOF TALABIXIYE AH

Waxaa kuu wanaagsanaan kara inaad la tashato qof khabiir ah inta aadan bilaabin ganacsiga. Xarunta talasiinta IFS waxay gaar ahaan caawineysaa qofka aan Iswiidhen ku dhalan oo doonaya in uu ganacsi bilaabo. Waxaa talooyinkaas lagu bixiyaa luuqado badan, waxaana laga helayaa meelo badan oo dalka ku yaal. Warbixin dheeraad ah waxaad ka heleysaa barta ifs.a.se

Barta verksamt.se/web/international/find-advisors waxaa laga helayaa liiska talabixiyayaasha aad la xiriiri karto.

VERKSAMT.SE

Barta verksamt.se waxaad ka akhrisan kartaa sida ganacsi looga bilaabo Iswiidhen. Warbixintaas oo af-ingiriisi ku qoran waxaa laga helayaa verksamt.se/web/international.

Wax dheeraad sii akhriso

QORAALKA KU SAABSAN FURASHADA SHIRKAD

Waxaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sida ganacsi loo bilaabo laga akhrisan karaa qoraalka Ganacsi-bilaabid. Qoraalkani wuxuu ku qoran yahay afafka iswiidhish, ingiriisi iyo af-iswiidhish fudud. Dhammaan qoraallada waxaa laga helayaa barta verksamt.se/fundera/starta-foretag-broschyren

SHIRKAD LA FURTO IYADOO AAN LACAG LA HAYSAN

Buugga ganacsi-bilaabid oo lacag la'aan ah waxaa laga akhrisan karaa dad kale oo horay ganacsi u bilaabay iyo weliba talooyin iyo tusaalooyin. Buuggu wuxuu ku qoran afafka iswiidhish, ingiriisi, beershi och carabi. Dhammaan qoraallada waxaa laga helayaa barta tillvaxtverket.se/startaforetag-utan-pengar



Wakaaladda kobcinta dhaqaalaha iyo horumarinta
Swedish Agency for Economic and Regional Growth
Tel 08-681 91 00
tillvaxtverket.se

tillväxt verket

Arbetsförmedlingen

Skatteverket